



Dib u Eegista Qabyo Qoraalka Qorshaha Aagga Skyway-West Hill Aqbalaya fikradaha dadweynaha inta u dhaxaysa Sebtember 30 – Diseembar 19*

*Laga soo qaaday ilaa Nofeembar 28

Qorshaha Degaan-hoosaadka Skyway-West Hill waa...

Qorsho 20 sano soconaya oo muujinaya himilada bulshada oo dejinaya siyaasado gacan ka geysanaya gaarista himiladan.

Maxaa ku jira...

- Himilada iyo Mabaadi'ida Hagaya Bulshada
- Sharaxaadda bulshada
- Isticmaalka Dhulka
- Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha
- Beeraha nasashada, meelaha banaan, iyo kheyraadka dhaqanka
- Gaadiid
- Adeegyada and yutiilitiga
- Hormarinta Dhaqaalaha

Sidoo kale: Wax-ka-bedelka khariiradda xuduudeynta iyo isticmaalka dhulka

Bayaanka Qabyo-Qoraalka ah ee Himilada Bulshada

Skyway-West Hill waxay noqon doontaa xaafad firfircoon oo socod lagu mari karo halkaas oo guryuhu ay yihiin kuwo qiimahooda la awoodi karo iyo meel ganacsiyadeeda ku salaysan bulshada ay yihiin kuwo kobcaya. Skyway-West Hill waxay noqon doontaa bulsho ku kala duwan qowmiyad ahaan iyo bulsho isku duuban halkaas oo codka wadajirka ah, xigmadda, iyo khibradda dadkeeda deegaanka ah iyo milkiilayaasha ganacsiga ay muhiim u yihiin go'aan-qaadashada madaniga ah ee joogtada ah.



Fikradaada nagula wadaag...
www.publicinput.com/Skyway

Maxaa xigga? Codkaaga/fikirkaaga ayaa la maqli doonaa...lana isticmaali doonaa!

Degmada King County waxay dib u eegi doontaa dhammaan fikradaha la helay waxayna wax ka bedelid ku samayn doontaa qorshaha iyadoo lagu salaynayo fikradahaas. Qorshaha Xaafad Hoosaadka ee ay Ku Taliyeen Golaha Fulinta waxaa loo diri doonaa Golaha Degmada King County horaanta sanadka 2022. Goluhu wuxuu dib-u-eegis ku samayn doonaa qorshaha, wuxuuna talooyin dheeraad ah ka raadin doonaa bulshada, isla markaana tafatir ku samayn doonaa qorshaha. Golaha waxaa la filayaa inay meel mariyaan qorshaha xilli dambe sanadka 2022.

Si aad u codsato macluumaadkan oo qaab kale ama luuqad kale ah, iimayl u dir
SubareaPlanning@kingcounty.gov ama wac 206-477-2717

Para solicitar esta información en otro formato o idioma, envíe un correo electrónico a
SubareaPlanning@kingcounty.gov o llame al 206-477-2717

Ma Haysaa S'aalo iyo Faallooyin/Fikrado? SubareaPlanning@kingcounty.gov